# Sidee ku ogaadaa in ilmaheyga horumar gaarayaan?

(How Will I Know If My Child is Making Progress? — Somali version)

Waa xaqiiqo in ilmuhu dugsiga u tagaan in ay wax bartaan, laakiin waalidka leh ilmaha naafada ah waxey mar walba is wediiyaan "Sidee ku ogaadaa in ilmaheygu waxbaranayo oo horumar gaarayo?" Waalidku waxuu sua'ashaa jawaabteeda ku heli karaa iyagoo eega macluumaad kala duwan, oo ay ka mid yihiin warbixinta waxbarashada gaar ahaaneed, waxbarashada guud ahaan iyo warbixinada ay ka helaan dugsiga dibadiisa.

## Asalka waxbarashada gaar ahaaneed

Sharciga waxbarashada gaar ahaaneed ee dib loo saxay 2004 (IDEA) waa sharci waxbarashada gaar ahaaneed oo xoogga saaraya natiijyada waxbarasho ee ardeyda ka kheyb qaadata waxbarashada gaar ahaaneed. Sharcigan waxuu farayaa in dugsiyadu raad raacaan oo ay ka war hayaan horumarka waxbarasho ee caruurta naafada ah. Kuwan soo socda waa afarta hab ee ugu wanaagsan:

**(1) Natiijyada ka soo baxday qiimeeyntii ugu dambeysay (The results of a student's most recent evaluation).** Ardeyda lagu tuhmayo in ay dib u dhac leeyihiin, waa in la qiimeeyaa inta aan loo bilaabin howlaha waxbarashada gaar ahaaneed. Qiimeyntan hore ee xoogga leh, waxaa lagu eegayaa waxyaabaha saameeya garashada, dhaqanka, koritaanka jirka iyo dhan walba ee lagu tuhmayo in uu dib u dhac ka jiro. Qiimeeynta ugu horeysa waxey u gogol xaareysaa, habka loo qiyaasi lahaa horumarka iyo qorsheynta wabarashada gaar ahaaneed. Mar haduu ilmahu yeesho qorsho waxbarashada gaar ahaaneed, dugsigu 3dii sano mar ayuu dib ugu laabanayaa oo eegayaa qiimeeyntii hore. Waxaad isu bar bar dhigi kartaa natiijyada qiimeeynta ugu dambeysa ee ilmaha lagu sameeyay iyo kuwii hore. Dabadeed waxaad halkaa ka ogaaneysaa horumarka ilmahaagu gaarayo. Waalidku waxuu xaq u leeyahay in la siiyaa gunaanadka warbixinnada qiimeeynta ilmaha laga qoro iyo in loo micneeyaa warbixinnadaa.

**(2) Gool sanadeed la cabiri kara (Measurable annual goals).** Qorshaha waxbarasho ee ilmahaaga waa in uu leeyahay gool sanadeed oo ah mid la cabiri kara. Kheyb walba ee gool loo yeelayo, waa in qorshaha lagu muujiyaa halka ilmuhu howsha fulinteeda ka bilaabay iyadoo qoraal ah. Qoraaladan gooleed waa in ay si cad u falanqeynayaan dhaqanka ama xirfadda la doonayo in ilmahu iska bedelo, halka la doonayo in uu isu bedelo iyo kartida laga doonayo in uu yeesho marka uu fuliyo howlahaa. Waxaad heleysaa warbixin kula socodsiineysa horumarka ilmuhu ka gaarayo goolka loo yeelay.

**(3) Warbixinta horumarka (Progress report).** Waraaqaha qorshaha waxbarasho waa in ay tilmaamayaan inta goor ee la cabirayo horumarka uu ilmahu ka gaarayo goolka iyo habka laguula socodsiinayo horumarkaa. Waalidka waa in la la socodsiiyaa horumarkaa mar walba ee caruurta kale ee caadiga ah la la socodsiinayo. Waalidku waxuu kaloo horumarkaa ku ogaan karaa iyagoo dugsiga ka hela waraaqaha loo yaqaan report cards, qoraallo kaloo ka hadlaya horumarka ama la kulma macalimiinta dugsiga. Warbixinnadaan oo idil waxey waalidka ku ogaadaan in horumarka ilmuhu gaarayo yahay mid u ansaxaya goolkii ku qornaa qorshahooda waxbarasho ee sanadka dhamaadkii laga filayay in ay gaaraan.

**(4) Dib ugu noqoshada qorshaha waxbarasho ee sanadka (Annual IEP review).** Qorsho cusub ayaa sanad walba loo qoraa caruurta ka kheyb qaadata waxbarashada gaar ahaaneed. Qorshuhu waa in uu ku jiraa bayaan cad oo tilmaamaya heerka waxbarasho ee ilmuhu markaa taagan yahay. Waalidku waxuu isu bar bar dhigi

karaa bayaankan iyo kuwii laga qoray sanadkii ka horeeyay. Tusaalo hadaan u soo qaadanno, waalidku waxuu is weydiin karaa: Ill'aa heerkee ayuu ilmaheyga akhriska horumar ka gaaray? Ill'aa heerkee ayuu ilmaheyga howl qabadka horumar ka gaaray?

## Asalka Waxbarashada Caadiga ah (Regular education sources)

Ilmaha dib u dhaca leh waxey xaq u leeyihiin in ay ka kheyb qaataan manaahijta guud ee loo dhiga ardeyda caadiga ah hadii ay ku haboon tahay. Waalidku waxuu warbixinno la xiriira manaahijta caadiga ah ka heli karaa halka laga helo waxbarashada caadiga ah.

**(1) Warbixinn ku saabsan howlaha fasalka oo aad ka heli karto macalimiinta (Classroom teacher information).** Haduu ilmahaagu ku qaato daraasada oo idil ama kheyb ka mid ah daraasada fasalladda caadiga ah, waxaad ka kheyb qaadan kartaa kulanka macalimiinta, shirarka dugsigu u qabto waalidka, ama marxaladaha dugsigu qabto si aad ula socoto oo aad warbixin uga hesho horumarka ilmahaaga. Waxaa kaloo warbixinno muhiim ah oo ku saabsan howlaha ilmuhu maalin walba qabtaan ka ogaan kartaa, natiijyada imtixaannada iyo waraaqaha reboorka.

**(2) Qiimeeynta degmada oo idil (Districtwide assessment).** Hadii ay haboon tahay, Caruurtu waxey xaq u leeyihiin in ay ka kheyb qaataan qiimeeynta guud ee degmada. Tusaalo hadaan u soo qaadanno; imtixaanka xirfado asaleedka ee gobolka Iowa (Iowa Basic Skills Test IBST) iyo imtixaanka horumarka gobolka California ( California Achievement Test CAT). Imtixaannadan waxaa lagu cabiraa oo la isu bar bar dhigaa horumarka waxbarasho ee ardeyda isku heerka ama isku da'da ah. Imtixaannadan oo sanad walba la qaado, waxaad ku ogaan kartaa in ilmahaagu horumar gaarayo.

**(3) Qiimeeynta Gobolka oo idil (Statewide assessment).** Caruurta naafada ah waxey kaloo xaq u leeyihiin in ay kheyb ka qaataan qiimeeynta gobolka iyadoo la tixgelinaya waxii waafajin ama hab doorin ah ee loo baahan yahay in lagu sameeyo imtixaanka. Hadii ay kooxdu isla garato in waafajin ama hab doorin keliya oo imtixaanka lagu sameeya waxba u qabaneyn ilmaha, oo aysan ka kheyb qaadan karin imtixaanka gobolka, dugsigu waa in uu la yimaadaa hab kale ee loo qiimeeya ilmaha. Qiimeeynta gobolka guud ahaaneed waxaa ka kheyb qaata ardeyda fasallada 3aad ila'aa heerka 8aad, 10aad iyo 11aad.

**Qiimeeynta guud ee Minnesota (Minnesota Comprehensive Assessment MCA-IIis)** Waa qiimeeyn loogu tala galay in lagu eego in dugsiyada gobolka oo idil fulinayaan xillka ka saaran xagga waxbarasho. Natiijyada ka soo baxda qiimeeyntan waxuu dugsiga ama degmada ku ogaaneysaa waxyaabaha u baahan in xoogga la saaro ama ay ku liitaan. Dabadeed dugsigu waxuu si haboon ilmaha uga caawini karaa habka ay ku gaari lahaayeen heerka waxbarasho ee gobolku ka filayey. Buundada lagu cabiro heerka ardeyga waa 1 oo ah mid hooseeya ila'aa 4 oo ah mid sareeya. Buundooyinkaan waxey kuu muujinayaan horumarka ilmahaaga ka gaarayo xirfadda looga baahan yahay in uu ku guuleysto heerka waxbarasho ee gobolka Minnesota.

**Imtixaanka xirfadda waxbarasho ee Minnesota (The Minnesota Test of Academic Skills MTAS).** Sida aan horey uga soo hadalnay, hadii ay kooxdu isla garato in waafajin ama hab doorin keliya oo imtixaanka lagu sameeya waxba u qabaneyn ilmaha naafada leh, oo aysan ka kheyb qaadan karin imtixaanka gobolka, dugsigu waa in uu la yimaadaa hab kale ee loo qiimeeya ilmaha. Habkan kale ee qiimeeynta ah waa mid lagu cabirayo horumarka ilmaha garashadooda akhriska, xisaabta iyo saayanska liito. Inkastoo ay imtixaannadan ku saleysan yihiin manaahij la mid ah kuwa gobolka Minnesota, haddana waa kala heer duwan yihiin. Imtixaannadan waxaa ka kheyb qaata ardeyda fasalka 3aad ila'aa heerka 8aad, 10aad iyo 11aad. Imtixaannadan xirfadda waxbarasho ee Minnesota waa kuwo aan la isticmaalin qalin iyo waraaq keliya ee la isticmaalo habab kale oo kala duwan. Macalinka ilmaha wax bara ama qof shaqaalaha dugsiga ka mid ah oo garanaya xaaladda ilmaha ayaa imtixaanka fidiya.

**Imtixaan asaleedka caadiga ah (Basic Standard Test BSTs)** Waa Imtixaan akhriska, qorista iyo xisaabta ah oo ay tahay in ardeygu ku baaso heerka gobolka si uu uga helo shahaado dugsiga sare ee

dadweynaha. 2009 ayaa ugu dambeyn doonta sharcigan ah in laga doonayo in ay ardeydu ku baasto imtixaankan si ay shahaado u helaan. Waxaa bedeli doona mid kale ee loo yaqaan qiimeeynta qalin jebinta (GRAD assessment).

**Imtixaanka qiimeeynta ee la iska doonayo qalin jebinta (Graduation-Required Assessment for Diploma GRAD)** Imtixaankan lo yaqaan GRAD waxuu bedeli doonaa Imtixaan asaleedka caadiga ah. Ardeyda qalin jebin doonta sanadka 2010ka ayaa ugu horeeya kuwa laga doonayo in ay sadexda qeybood oo imtixaanka ku baasaan si ay uga qalin jebiyaan dugsiga sare ee Minnesota. Imtixaankan waxaa lagu cabirayaa aqoonta akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Ardeydu waxey imtixaankan qaadan karaan in mar qura ka badan.

**(4) Sharcigga ka hortagga dib u dhaca ilmaha (No Child Left Behind Act.)** Ilmaha naafada ah waxey sharci u leeyihiin in lagu daraa qiimeeynta dugsiga ee sanadka si loo xaqiijiyo in ardeyda oo idil horumar ka gaarayaan waxbarashada. Waalidka waa la la socodsiinayaa in dugsigu wanaag wax u barayo caruurta qaarkood, oo ay ka mid yihiin kuwa naafada leh.

## Akhbaarrada laga helo dugsiga dibadiisa (Information from outside the school)

Dugsiga ma aha meesha keliya ee akhbaar ku saabsan horumarka ilmaha laga heli kara. Qiimeeyn madax bannaan iyo iyadoo la indha indheeyaaba waad ku ogaan kartaa horumarka ilmaha.

### Qiimeeyn madax bannaan (Independent evaluation)

Waxaa kaloo ilmaha lagu qiimeeyn karaa xarun ka madax bannaan dugsiga. Mararka qaarkood waxaa lacagtaa bixiya degmada dugsiga mararka qaarkoodna waalidka ayaa la baxa. Si walba h'a ahaatee, natiijyada qiimeeyntaa madax bannaaan waxaad u bar bar dhigi kartaa natiijyadii imtixaanadii hore iyo horumarkii hore.

### L'a socoshada iyo ka warhaynta xirfadda ilmuha marka uu joogo guriga iyo jaaliyadaba.

Waxaad la socon kartaa oo aad indhaha ku hayn kartaa in ilmahaagu isticmaalayo xirfadaha ay ku soo barteen dugsiga. Taasi micnaheedu waa in ilmahaagu isticmaalayo xirfadda marka uu joogo meela kala duwan sida guriga, Jaaliyadda iyo dugsiga. Tusaalo haddan u soo qaadanno, hadalka ilmahaaga yiraahdo, isku si ma loo fahmayaa marka uu joogo guriga iyo marka uu joogo maqaayadda? Ilmahaaga xisaabta lacagta marka waraaq lagu qoro keliya miyuu garanayaa misa marka uu dukaanka joogo wuu garanayaa baaqiga in loo soo celiyaa tahay? Ilmahaaga xirfadahan miyeey horumar ka gaareen marka loo bar bar dhigo sanadkii hore?

## Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu wax horumar gaareeyn?

Hadaad u arkayso in ilmahaagu wax horumar qeymo leh waxbarashada ka gaareeyn, waxaad codsan kartaa kulan aad kaga wada hadleysaan in dib loogu noqdo qorshahooda waxbarasho ee gaar ahaaneed. Dugsigu ma ballan qaadi karo in ilmahaagu gaarayo goolkii lagu xusay qorshahooda waxbarasho ee laga doonayay in ilmahu gaaro, hase ahaatee, dugsigu waa in uu si daacad wanaag ah isugu deyaa ee u caawiyaa ilmaha si ay u gaaraan goolkaa.

Kulan ayaa kooxda la isugu yeeri karaa si ay dib ugu noqdaan qorshaha oo ay ula yimaadaan xal lagu taageerayo in ilmahaagu horumar gaaro. Waxaa laga yaabaa in ilmahu u baahan yahay in laga bedelo:

- qorshaha waxbarashada gaar ahaaneed iyo howlaha la xiriira
- qalabka caawimaadda ah
- manaahijta ama habka wax loo baro
- halka uu wax ku barto

Hadii ay kooxdu isku raaci weydo in ilmahaagu horumar qeymo leh gaarayo, waxaa laga yabaa in ilmahu u baahan yahay qiimeeyn xagga waxbarashada ah oo siyaado ah. (Hadii aad dooneyso warbixinno siyaado ah oo qiimeeynta ku saabsan waxaad ka heli kartaa qoraalka uu qoray mashruuca PACER ee cinwaankiisu yahay "**PHP-c2so, Qiimeeyn: Maxay u micno tahay ilmahaaga?**")